











Marka la isu diyaarinayo xaaladaha deg-degga ah
Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

TUSMADA

-  3 Buugyarahani wuxuu kuu sheegayaa wixii aad samayn lahayd marka xaalad deg-deg ah ay dhacdo
-  4 Talo-siin guud oo ku saabsan wixii aad samayn lahayd marka xaalad deg-deg ah ay dhacdo
-  6 Sida looga hor-tago xaaladaha deg-degga ah ee gaarka ah
-  10 Wixii aad samayn lahayd haddii aadan guriga joogin
-  12 Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya ee Aasaasiga ah
-  14 Marka la isu diyaarinayo xaalad deg-deg ah – Waxaad awoodi kartid inaad samayso
-  16 Sida gacan looga dhiiban karo ka hor-tagga weerar argagixiso
-  18 Waa maxay hawsha la wado sidii loo ilaalin lahaa Ingiriiska?
-  20 Lambarada lala xiriiri karo marka xaalad deg-deg ah ay dhacdo
-  21 Waxyaabaha ay tahay in la xusuusnaado



Shayga loo adeegsaday daabacaaddan wuxuu ka kooban yahay 75% oo ah wixii ka soo haray khasaaraha macmiilka iyo 25% oo ah mayrax cusub.



Buugyarahani wuxuu kuu sheegayaa wixii aad samayn lahayd marka **xaalad deg-deg** ah ay dhacdo



“Ururka Qorshaynta Xaaladaha deg-degga ah wuxuu aaminsan yahay in buugyarahani uu dad-weynaha ugu deeqayo talo-siin qiimo leh oo si caadi ah loo garan karo, taas oo si sahlan loo adeegsan karo xaalado tiro badan ee guriga gudahooda. Talo-siintani inay gaari doonto guri kaste taasi waa mid fiican.”

Debbie Spargo, Chief Executive of the Emergency Planning Society (Maamulaha Sare ee Ururka Qorshaynta Xaaladaha deg-degga ah)

Dawladdu waxay si xoog leh ugu dadaalaysaa inay xaqiijiso in Ingiriisku uu u diyaarsanaado inta uu awoodi karo markay timaaddo dhacdo deg-deg ah, waana muhim inaad adigu diyaar ahaataa. Marka aad warka haysid oonad diyaar tahay, waxaa surogal ah in aad aad hoos ugu dhigid khatarta soo gaaraysa nafta iyo hantida.

Buugyarahani wuxuu kuu sheegi doonaa sida aad u caawin kartid naftaada iyo qooyaskaaga xaaladaha deg-degga ah gudahooda. Akhbaartani badi waxay ku salaysan tahay talo-siin caadi dadka u ah waxaana dhici karta inay adiga kuula eekaato wax iska cad oonad iska-taqaan, laakiin hore ayay dad u badbaadisay. Wuxuu sido kale kuu sheegi doonaa wixii la qabtay si loo diyaariyo oona loo ilaaliyo waddankeena sanaddadii hadda tagay.

Talo-siin guud oo ku saabsan wixii **aad samayn** lahayd marka xaalad deg-deg ah ay dhacdo

Haddii ay xaalad deg-deg ahi ku qabsato, garashada caadiga ah ee aad leedahay iyo dareenkaaga ayaa caadi ahaan kuu sheegi doona waxay tahay inaad samaysid. Haseyeeshee, waxaa muhiim ah in:

- Aad xaqiijiso in la wacay **999** haddii dad dhaawacmeen ama haddii ay naftu halis ku jirto
- Aadan halis gelin naftaada ama nafta dadka kale
- Aad samayso sida ay kugula taliyaan adeegyada gar-gaarka deg-degga ah
- Aad isku-daydid inaad is-dejisiid oo aad fakartid ka hor inta aadan wax samayn, iyo inaad isku-daydid inaad dadka kale shaki ka saartid.
- Iska-fiiri wixii dhaawac ah – xusuusnow inaad adigu is-badbaadisiid ka hor inta aadan isu-dayin inaad dadka kale gar-gaartid.

Haddii ayna dhacdadu adiga ku khusayn, laakiin aad meel u dhow joogtid ama aad u malaynaysid in ay dhici karto inaad khatar ku jirtid, sida ugu badan talada la bixinayaa waa:

- Soco oo gal dhismo nabad leh
- Halkaas dhex joog ilaa iyo inta lagu oranayo wax kale samay
- Raadiyaha iyo Telefishinka ee xaafadda daaro si aad u hesho akhbaar dheeraad ah

Runtii, waxaa marwalba iman doona xaalado gaar ah oo ay tahay in aadan “gelin” dhismo. Tusaale ahaan haddii u dab dhasho. Haddii kale: **Gudaha gal, Halkaas joog, Daaro raadiyaha iyo telefishinka.**

Talada ah **Gudaha gal, Halkaas joog, Daaro raadiyahaha iyo telefishinka** waa mid laga yaqaan oo laga isticmaalo dunida. Guddiga Isteerinka Qaranka ee Madaxbannaan (Independent National Steering Committee) ee Dad-weynaha Digniin iyo Akhbaarba siiyaa ayaa tani horumariyey si ay u noqoto talada guud ee ugu fiican ee la siiyo dadka ay qabsadaan xaaladaha deg-degga ah ee ugu badan.



**Gudaha gal, Halkaas joog,
Daaro raadiyahaha iyo telefishinka**



Shirkadaha raadiyahaha iyo telefishinka waxaa lagula heshiiyey haddii xaalad deg-deg ah oo weyn ay dhacdo inay joojiyaan barnaamijyadooda si ay dad-weynaha u siiyaan talo amniga la xiriirta iyo akhbaarku saabsan dhacdada, si markaad **Daaratid raadiyahaha iyo telefishinkaba** aad u heshid talada aad u baahantahay meel kasto o aad Ka joogtid waddanka UK'ga.

Raadiyahaha iyo telefishinka daaro

Sida looga hor-tago **xaaladaha deg-degga ah ee gaarka ah**

Adeegyada gar-gaarka deg-degga ah waxay tababar u leeyihiin sida looga hor-tago xaalado deg-deg ah oo aad u kala duwan, laakiin waxaa jira waxyaabo badan oo adigu qaban kartid si aad u caawiso iyaga iyo naftaada.

- Yaree wixii gurigaaga yaal ee ah halis dab keenaysa
- Rakib oona ilaali qayla-dhaanyada qiiq – dabaq kasteba waa inuu ugu yaraan mid lahaadaa
- Ugu badnaan dabku wuxuu geeri iyo dhaawac keena markay dadku hurdaan. Qorsheyso jid guriga looga bixi karo haddii uu dab bilaabmo habeenka dhexdiisa.
- Haddii u dab dhasho, dibadda u bax, halkaas joog soona wac **999**
- Weligaa ha isticmaalin ashansooraha
- Haddii aad dhex-socotid ama aad ka bixi kari weydey dab dhulka u dhawow halkaas ayay hawadu ugu nadiifsan tahay
- Haddii albaab uu kulul yahay, ha furin, waayo taasi waxay kollayba micnaheedu tahay dab ayaa ka dambeeya
- Xusuusnow – dib ha u gelin gurigaaga ilaa iyo inta ay Adeegga Dab-damiska iyo Bad-baadadu ay meel nabad ah ka dhigaan

Habka looga hor-taago loogana badbaado dabka



“Ha is-oran marka uu dab dhaco ayaan ka fekeri doonaa. Iminka wax qabo. Qiyaastii wixii dab ah oo dhan waa laga hor-tagii karaa. Talo intaas dhaafsan oo la fulin karo, si dhib yar loo raaci karo oo ku saabsan sida dab looga hor-tago loona ilaaliyo gurigaaga waxaad ka heli kartaa xarunta dab-damiska ee xaafaddaada.”

Alan Doig, President of the Chief and Assistant Chief Fire Officers' Association (Madaxa Ururka ay leeyihiin Sarkaalada Dab-damista ee Sare iyo Ku xigeenkooda)

Haddii digniin bunbo ay ka dhacdo meesha aad ka shaqaysid, daba-raac talo-siinta ay bixiyaan dadka maamulka haya.

Haddii bunbo ay ka qaraxdo daarta aad ku jirtid, fiirso sida ugu nabad badan ee dibadda loogu bixi karo.

Haddii aad dabin gashid firdhaad dhexdooda:

- Derbi ag joog oona garaac tuubbooyinka si dadka gurmada wada ay kuu maqli karaan
- Ha isticmaalin kabriidyo ama qarxisooyinka sigaarka lugu shito waayo waxaa dhici karta in gaas uu fakanayo

Haddii bunbo ay ku qaraxdo dibadda, daartaada iska dhex-joog (kana dheerow daaqadaha, asanshoorada iyo albaabada dhinaca dibadda ku yaal) waayo waxaa dhici karta in bunbo labaad ay meelahaas taal.

Haddii aad qaraxa aragtay, meelahaas joog meel nabad ah ku sugnow booliskana u sheeg wixii aad aragtay.

Bambooyin

Adeegga Dab-damiska iyo Bad-baadada waxaa sanadahan hadda tagay la siiyey qalab iyo tababar si ay dad badan si deg-deg ah uga mayraan wixii faddarayn ah. Tani waxay ka dhigan tahay in saabbuun lugu qubeysto ka dibna la gashado maryo ku meel gaar ah oo lugu deeqi doono. Waxaa muhiim ah in tani lugu sameeyo halkii ay wax ka dhaceen si meelo kale aan loo faddarayn, taas oo ay soo raacaan guryahu. Haddii ay lagama-maarmaan noqoto waxaa ku baari doona shaqaalaha adeegga caafimaadka.

999

- Shayga keenay halista ka fagow
- Laakiin sug ilaa iyo inta ay imanayaan adeegyada gar-gaarka deg-degga ah si ay kuu baaraan oo, haddii loo baahdo, ay kaaga mayraan wixii faddarayn ah
- Haddii aad guriga tagtid adoon lugu daawayn waxaad faddarayn kartaa dadka kale waxaanad sii xumayn kartaa dhacdo kaste

Dhacdo kiimikada, nafleyda ama kaah-falka la xiriirta (CBR)

Haddii ay korontadu tagto, bakhitii qalabka korontada ku shaqeeya ee si toos ah isu shidi doona marka korontadu ay soo noqoto – haddii ay dhawr wada daarmaan, waxay culays saa'id ah ayay khadka danabka saari karaan. **Daaro** oo dhegeyso raadiyaha xaafaddaada si aad u hesho talo-siin iyo wararka cusub adigoo isticmaalaya raadiye beytari ku shaqeeya.

*Dhammaan
xaaladahan
marka aad ku jirto
– is-deji, horta ka
fikir inta aadan
wax qaban
dhegeysona talada
ay bixinayaan
adeegyada
gar-gaarka deg-
degga ah.*

Qorshooyin la xiriira gar-gaarka deg-degga ah ayaa ka jira dhammaan gobolada Ingiriiska

Booliska, adeegyada dab-damiska iyo aanbalaaska ayaa tijaabiyey oona hore u isticmaaley qorshooyinka loogu tala-galay in wax lagaga qabto dhacdooyinka, dab iyo qaraxyo iyo wixii u dhexeeya, hadday ka dhacaan gurigaaga, dugsigaaga ama haddii ay saameyaan gaadiidka.

Caafimaadka iyo isbataalada

Qalab, tallaalo iyo daawooyinka dila jeermisyada cudurada oo loogu tala-galay gar-gaarka deg-degga ah ayaa lugu kaydiyey UK gudahiisa si dhakhso badan ayay takhtaradu u heli karaan.

Taba-bar qaadashooyinka lugu qorsheynayo gar-gaarka deg-degga ah

Sanad walba, taba-bar qaadashooyin badan ayaa la qabtaa kuwaas oo ay ka qayb-qaataan adeegyada gar-gaarka deg-degga ah iyo dhammaan hay'adaha raysashada masuul ka ah. Taba-baryadani waxay noo fasaxaan inaan ku cel-ceshano hawsha aan ka qaban doonno xaalado deg-deg ah oo kala duwan, oo ay ka mid tahay argagixisnimadu, annagoo tijaabinayna diyaar-ahaanteenna.

Wixii aad samayn lahayd haddii **aadan** guriga **joogin**

Dugsiyada

Haddii ay carruurtaadu joogaan dugsiya dabcan waxaa rabi doontaa inaad soo kexeysid iyaga markaaba haddii ay arrin deg-deg ahi dhacdo. Laakiin ammaan ma aha inaad taas samaysid. Fadlan **Daaro** oo dhegeyso raadiyaha xaafaddaada si aad u hesho talo iyo macluumaad ku saabsan sida dawladdaada hoose ay u ogaysiin doonto waalidka goorta ay tahay inay carruurtooda ka soo doonaan dugsiya.

Dugsiyada dhammaantood waxay haystaan qorshooyin ay kaga hor-tagayaan wixi xaalado deg-deg ah oo xaafadda ka dhaca sida dab iyo daad, macallimiinta iyo shaqaalaha kalena waxay dhammaan sameeyn doonan waxay awoodi karaan si ay u daryeelaan ardayda ay masuul ka yihiin. War dheeraad ah oo ku saabsan qorshaynta xaaladaha deg-degga ah ee dugsiyada waxaad ka heli kartaa www.teachernet.gov.uk/emergencies

...Inay carruurtaadu nabad-galaan



Meelaha ganacsiga

Loo-shaqeeyayaashu masuuliyadda amniga iyo nabadda shaqaalahooda iyaga ayaa qaba. Dhammaan meelaha ganacsigu waxay diyaariyeen wax lagaga hor-tago saamaynta ay keento dhacdo ama masiibo weyn. Xaqiiji inaad fahamsan tahay waxaad u baahan tahay inaad samaysid haddii arrin deg-deg ah ay ka dhacdo shaqada.

Haddii aad leedahay meel ganacsi, si aad u heshid talo ku saabsan qorshaynta la xiriirta xaaladaha deg-degga ah u booqo www.mi5.gov.uk

In nabad lugu sugnaado inta shaqada la joogo...



Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya ee Aasaasiga ah



“Marka ay is-diyaariyaan oo ayna fahmaan waxyaabaha aasaasiga ah ee la xiriira Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya, dad-weynahu gar-gaar weyn ayay bixin karayaan ilaa iyo inta adeegyada gar-gaarka deg-degga ah ay imanayaan si ay hawsha u sii wadaan – waxay naga caawisaa dad bad-baadintood.”

Liam Donaldson, Chief Medical Officer (Masuulka Caafimaadka ee Sare)

Waa lagama-maarmaan In la ogaado waxa la samayn doono markay xaalad deg-deg ah ay dhacdo. Ka feker inaad qaadato tababar yar oo loogu tala-galay Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya iyo qalabka Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya, si fiicanna u baro sidii aad wax uga qaban lahayd xaaladaha caadiga sii ah ee halka soo jeedda ku qoran. Haddii uu qof dhaawacmo, tallaabooyinkan soo socda ayaa nabadiisa ilaalin doona hadba siday suurogal u tahay ilaa iyo inta uu qof xirfad leh imanayo:

- Haddii ay dad si xoog leh u dhaawacmeen markaasba wac **999**
- Is-deji
- Xaqiiji in adigu ama qofka dhaawacmay aadan halis ku jirin
- Si fiican u eeg xaaladda qofka dhaawacmay waxaad ogaatona wax ka qabo adigoo adeegsanaya tallaabooyinka Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya ee halka soo jeedda ku qoran – xusuusnow, kuwani ma aha hage Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya oo dhan
- Ilaali xaaladda qofka dhaawacmay ilaa iyo inta adeegyada gar-gaarka deg-degga ah ay imanayaan

Haddii qofku uu suuxsan yahay oo uu u eeg yahay qof ay nafi ku jirin, wac **999** oo weydiiso in luguu soo diro aanbalaas. Haddii adigu ama qof meesha taagan aad leedihiin xirfadaha loo baahan yahay, dib usoo nafi adigoo isticmaalaya habka af-af u gelin inta aad sugaysaan adeegyada gar-gaarka deg-degga ah.

Suuxsanaan

Dhiig baxa badan jooji adigoo naburka si yara culus u cadaadinaya isticmaalna maro nadiif ah oona engegsan ka sareysiina wadnaha. Qofka jiifi dhulka, shaki ka saar, dhaxan ka ilaali oo ka dabci dharka ku giijisan.

Dhiig bax

Wixii la xiriira gubashooyinka dhammaantood, ugu yaraan 10 daqiiqo biyo ku qabooji. Meesha dhaawacu uu gaaray ku xir bac ku dhagta (clingfilm) ha saarin maro engegsan, bukanaha dhaxanta ka ilaali wacna aanbalaas.

Gubashooyinka

Isku-day inaad iska ilaaliso wixii dhaq-dhaqaaq ah sida ay u suurogasho.

Lafo jajabay

Haddii aad rabtid war ama talo-siin dheeraad ah, u booqo www.redcross.org.uk/firstaid ama www.nhsdirect.nhs.uk

Marka la isu diyaarinayo xaalad deg-deg ah – Waxaad awoodi kartid **inaad** samayso

Si aad isugu diyaarisid xaalad deg-deg ah, waa inaad isa siisa waqti aad ku:

- Meesha laga xiro iyo sida loo xiro biyaha, gaaska iyo sida iyo meesha laga bakhtiiyo korontada gurigaaga dhexdiisa
- Hawlaha gar-gaarka deg-degga ah ee diyaar u ah carruurtaada intay dugsiga joogaan
- Hawlaha gar-gaarka deg-degga ah diyaar ku ah meesha aad ka shaqaysid
- Habka ay qooyksaagu isula sii xiriiri doonaan marka xaalad deg-deg ah ay dhacdo
- Haddii dadka dariskaaga ah ee ama duqoobay ama daciifka ah ay kaaga baahdaan caawimo
- Habka loo daarto raadiyaha xaafaddaada



Haddii aad gurigaaga joogto oo ay timaad xaalad deg-deg ah, isku-day inaad soo uruursatid:

- Lambarada muhiimka ah, sida lambarka takhtarkaaga iyo qaraabadaada
- Mafaatiixda guriga iyo baabuurka
- Shayada musqusha lagaga isticmaalo, waxyaabaha la isu nadiifiyo iyo wixii ah daawo si joogtaha uu takhtarku u qoro
- Raadiye beytari ku shaqaysa, oo ay la socdaan beytari dheeraad ah
- Toosh wadata beytari dheeraad ah, shumacyo iyo kabriid
- Qalabka Gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya
- Telefoonkaaga gacanta
- Lacag iyo kaararka deynta
- Dhar iyo busteyo dheeraad ah

Weliba, waxaa marwalba waxtar leh inaad haysatid:

- Biyo caagad ku jira, cunto diyaar ah (sida cunto qasacad ku jirta) iyo qalab cagad/qasacad lugu furo, waayo waxaa dhici karta inaad gurigaaga joogto dhawr maalmood

Marar aan caadi ahayn qaarkood, waxaa dhici karta in adeegyada gar-gaarka deg-degga ah ay kaa cadsadaan inaad guriga ka baxdid. Haddii ay tani dhacdo, u bax sida ugu dhakhso badan una daggan ee suurogal ah. Haddii ay waqti u haysatidna:

- Bakhtii korontada, xir gaaska iyo biyaha, bareesada ka saar qalabka guriga qufulna dhammaan albaabada iyo daaqadaha
- Shayada ku taxan dusha eeg si aad u ogaato waxaad u baahantahay inaad qaadato
- Haddii aad baabuurka ku baxdid, qaado biyo caagad ku jira iyo busteyo, daarona raadiyaha xaafaddaada si aad u hesho talo iyo tilmaan-bixinta la xiriira xaaladda deg-degga ah

Marka lugu sheego inaad nabad gurigaaga ugu soo noqon kartid, fur daaqadaha si ay hawo u soo gasho ka hor inta aadan dib daarin gaaska, korontada iyo biyaaha.

Sida gacan looga dhiiban **karo ka hor-tagga** weerar argagixiso

“Dhammaan macluumaadka laga helo khadka telefoonka waa la baara ka hor inta booliisku uusan wax qaban. Annaga ayaa go’aan ka gaari doonna in warka aad haysaa uu yahay mid qiimo leh ama uusan ahayn. Waxaan weli aad ugu baahannahay caawimadaada si aan u yarayno khatarta argagaxisooyinku ay keenayaan. Runtii waxaa laga hortagey dhawr dambi oo culus oo ay argagaxisooyinku ay rabeen inay sameeyaan dhageysiga iyo araga dad-weynaha awgood.”

Peter Clarke, Deputy Assistant Commissioner
ACPO National Co-ordinator of Terrorist Investigations (Ku xigeenka Hoggamiye Caawiyaha booliiska, ACPO Isu-duwaha Qaran ee Baaritaanyada Argagixisooyinka)

*Waxaad soo wacdaa Khadka Ka hortagga Argagixisinimada ee Booliiska oo ah 0800 789 321. Dhammaan telefoonada la noo soo diro si qarsoodi ah ayaa loola macaamili doonaa. Haddii aad u malaynayso inay nafi halis ku dhowdahay, wac **999**.*



Waxaa dhici kartaa inaad haysid war lagama-maarmaan ah. Haddii aad maqasho, aragto ama aad la kulanto wax xiriir la leh dhaqdhaqaaq argagixiso, fadlan booliiska u sheeg. Waxay rabaan inay war kaa heelaan.

Argagixisooyinku waxay u baahanyihiin...

Meel ay ku noolaadaan: Ma ka shakisan tahay dadka gurigaaga ama hoteelkaaga kaa kiraystay?

Inay qorshe samaystaan: Miyaad aragtay qof sii aan caadi ahayn u fiirinaya qalabka amniga ee meelkaste ku xiran?

Lacagta: Dadku waxaa laga yaabaa inay furtaan koontooyin bangi oo been ah, ay nuqulo ka sameeyaan kaararka deynka, ay alaab dib u ceshaan si loogu soo celiyo lacago badan oo cad.

Qalabka: Haddii aad qof dukaan leh, miyaad haysaa sabab uu shaki kaaga galay aalab uu qof iibasanayo?

Calaamadaha suuroobi kara ee argagixisinimada

Awooddeena aan kaga hortagi karno weerar argagixiso ku ma xirna oo keliya dawladda. Sida fiican ee aan wax uga qabannaa adiga ayay sidoo kale kugu xiran **tahay**.

Warar iyo talo wax-tar leh waxaad ka heli kartaa halkan www.preparingforemergencies.gov.uk



“Ka hortagga argagixisnimadu waxay MI5 siisay ahmiyadda ugu weyn. Annagoo si xoog leh ula shaqaynayna hay’adaha fulinta sharciga iyo soo uruurinta sirta ee aan is-kaashanno, waxaan ku dadaalaynaa inaan Ingiriiska nabaddiisa ilaalino oo dhibno argagixisooyinka raba inay halkan wax ka sameeyaan. Laakiin digtoonida, wax-garadka iyo wada-shaqaynta dad-weynaha baa sidaas oo kale u yihiin qayb muhiim ah oo laga-marmaarmaan ah oo ka mid ah guud ahaan hawsha jawaab-celinta ee Ingiriisku uu diyaariyey.” **Eliza Manningham-Buller, Director General of the Security Service (MI5) (Guddoomiyaha Sare ee Adeegga Nabad-ilaalinta)**

Qaraxyada argagixiso waxay sida ugu badan ka dhacan meelaha dad-weynaha loogu tala-galay, khaas ahaan meelaha ay dadku isugu soo uruuraan ama u safaraan.

- Digtoonow
- Iska-ilaali wixii akhlaaq, baabuur ama baakadyo ah ee shaki leh
- Ha ka hakan inaad booliiska u sheegto

Digtoonow

Marwalba oo aan go’aan ka garayno warka iyo digniin aan ugu tala-galnay dad-weynaha waxaan ahmiyadda ugu weyn siinnaa amniga shacabka. Dawladdu waxay qorshaysatay inay digniin jeediyaan marka uu dad-weynuhu wax-samayn karo si ay wax uga qabtaan halis khaas ah oo caqli gal ah. Digniintaas oo kale waxay weliba bixin doontaa akhbaar dheeraad ah oo dad-weynaha ka caawin kara inay si wax-tar leh u jawaab-celiyaan.

Qorshaha dawladdu ay ugu tala-gashay argagixisnimada

Waa maxay hawsha la **wadaa** sidii loo ilaalin lahaa Ingiriiska?

Booliiska, adeegyada dab-damiska iyo aanbalaaska waxaa si gaar ah loogu tababaray sidii ay wax uga qaban lahaayeen xaaladaha deg-degga ah ee weyn waxayna haystaan qalab gaar ah oo loogu tala-galay in lagaga hortago dhacdooyin badan oo kala duwan. Haddii loo baahdo, Dawladdu iyo adeegyada gar-gaarka deg-degga ah waxay codsan karaan taageerada ciidanka.

Iminka waxaa la kor-dhiyey baaritaankii lugu sameynayey shandadaha iyo rakaabka marka la joogo garoon dayuuradeed ee Ingiriiska, marka haboonna diyaaradaha Ingiriisiga waxaa la socda askar dhar cad sitta. Albaabo sii adag ayaa lugu rakibay shirka diyaarad walba oo weyn.

Qalab ilaalo-gaar ah oo casriyaysan ayaan weliba ku rakibnay dekedaha iyo meelaha baabuur lagaga soo galo Ingiriisiga. Sidoo kale, dhammaan shirkadaha gaadiidku waxay haystaan qorshooyin deg-deg ah si ay nabad ahaan kaaga saaraan meeshaad joogtay haddii ay dhibaato timaado.

Si aad isaga fiiriso amniga meel aad u socoto ama waddan gaar ah, wax ka weydii wakiilka safarkaaga ama Wasaaradda Dibadda iyo Bar-waaqosooranka oo shabakadiisu tahay www.fco.gov.uk ama soo wac 0870 606 0290.

Safarka



Saddexdii sanadood ee na soo dhaafay waxaa horumaray nabad-ilaalinta ilaha-dhaqaale ee qaranka ee aasaasiga ah sida qalabka biyaha, tamarta iyo gaadiidka, talo ku saabsan amniga ayaa la siiyey meelaha ganacsiga iyo meelaha kale ee baylah noqon kara, sharcigaan waa la adkeeyey si ay argagixisooyinka ugu adkaato inay halkan wax ka sameeyaan.

Hawshan qayb badan oo ka mid ah ayay tahay inay qarsoodi ahaataa argagixisooyinka iman karaa si ayna u heshoon war wax-tar leh.

Horumarka Ingiriiska

Ingiriisku sanado badan ayuu haystey halista argagixisinimo adeegyada gar-gaarka deg-degga ahna si fiican u meel-dhigeen qorshooyin iyo hab wax lagaga qabanayo dhacdooyin badan oo kala duwan.

Dawladdu waxay haysataa ajande idil oo wax-qabad si ay u horumariyaan jawaab-celiska laga bixinayo xaalado deg-deg ah oo kala duwan oo saameyn kara Ingiriiska, argagixisinimo keligeed uun ma aha.

Waxay ujeedda inay hubiso inaan awoodi karno inaan wax ka qabanno xaaladaha deg-degga ah marka la eego waddankoo dhan, gobolada iyo xaafadaha, iyo inay xaqiijiso in adeegyada aasaasiga ah (adeegyada cunneed, biyaha, gaadiidka, caafimaadka iyo dhaqaalaha iwm) ay sii shaqeeyaan.

Lambarada lala xiriiri karo marka xaalad deg-deg ah ay dhacdo

Waxaa suurogal ah inay wax-tar kuu lahaato inaad dhammaystirtid lambaradan lala xiriiri karo oo aad ku haysatid meel nabad ah. Waxaad lambaradan ka heli kartaa buugga telefoonada ee xaafaddaada.

Magaca	Lamabarka telefoonka
Adeegyada gar-gaarka deg-degga ah	999
NHS Direct (Adeegga Qaran ee Caafimaadka Toos)	0845 4647
Khadka telefoonka ee ka hortagga argagixisnimada	0800 789 321
Wasaaradda Dibadda iyo Bar-waaqosooranka	0870 606 0290
Xerada Booliiska ee Xaafadda	
Dawladda Hoose	
Takhtarka	
Shaqada	
Dugsiga	

Raadiiyaha Xaafadda	Mawjadda (ka eeg jaraa' idka xaafadda)

Si aad u hesho akhbaar intaas dhaafsan oo ku saabsan xaaladaha deg-degga ah isu-diyaarintooda u booqo www.preparingforemergencies.gov.uk



Xusuusnow...

Haddii ay xaalad deg-deg ahi ku qabsato waxaa muhiim ah in:

- Aad xaqiijiso in **999** la wacay haddii ay dad dhaawac yihiin ama naftu ay halis ku jirto
- Aadan khatar gelin naftaada ama nafta dadka kale
- Aad qaadato talada adeegyada gar-gaarka deg-degga ahi ay ku siiyaan
- Isku-day inaad is-dejiso oonad fakartid inta aadan wax samayn iskuna day inaad shaki ka saartid dadka kale
- Dhaawac iska-fiiri – xusuusnow inaad naftaada horta wax u qabataa ka hor inta aadan isku-dayin inaad dadka kale caawisid

Haddii ayna dhacdadu adiga ku khusayn, laakiin aad meel u dhow joogtid ama aad u malaynaysid in ay dhici karto inaad khatar ku jirtid, sida ugu badan talada la bixinayaa waa: **GUDAHA GAL, HALKAAS JOOG, DAARO RAADIYAHA IYO TELEFISHINKA.**

Si aad u hesho akhbaar dheeraad ah waxaad u booqan kartaa www.preparingforemergencies.gov.uk

Boggan jeexo meel nabad ahna dhigo si aad u tixraacdid.

© Crown Copyright 2004

Qoraalka dukumentigan ku yaal kobbi ayaa laga samayn karaa qaabkastaba ama war-baahin kaste loomana baahna ogolaansho gaar ah. Taasi waa haddii aan qodobada loo isticmaalayn hab liidid ah ama marka la siinayo macne guud oo marin-habaabin leh. Asalka qodobada waa in loo gartaa in ay xuquuqda daabacaadda leedahay Boqortayudu (Crown copyright) waana in cinwaanka dukumentiga la raaciyaa wixii koobbi ah ee laga sameeynayo taas oo ka mid ah daabacaad kale ama adeeg kale.